

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

Wasaaradda Gargaarka iyo Maareeynta Masiibooyinka



جمهورية الصومال الفيدرالية

وزارة الشؤون الإنسانية وإدارة الكوارث

The Federal Republic of Somalia
Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management



War Murtiyeedka shirka Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka DFS Iyo Wasaaradaha/Hay'adaha G&MM Dowlad Gobleedyada

-Muqdisho-

14 Abriil 2019

Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta musiibooyinka Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya iyo Wasaaradaha/hey'adaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee heer Dowlad Gobaleed ayaa kulankoodii ugu horreeyay isugu yimid magaalada Muqdisho

Kulanka oo socday 13-14 Abriil 2019 waxaa looga hadlay laba ajande oo muhiim u ah howlaha gargaarka iyo dar dar galintooda

- 1) Ka tashiga fulinta Mashruuca **ka jawaabidda xilliga dhaw ee xaaladaha deg degga** mashruucaas oo muddo hakad kujiray, iyo
- 2) Xoojinta xiriirka wadashaqeynta Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta musiibooyinka Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya iyo Wasaaradaha/hey'adaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee heer Dowlad Gobaleed

Waxaa sidoo kale inti uu socday shirka awaamir laga soo saaray hannaanka isku duwidda, hagida iyo fulineed ee barnaamijyada Gargaarka ah ee laga fulinayo guud ahaan dalka.

Waxaa la isla gartay:

- 1- Waxaa la cadeeyey in dalka ay ka jirto xaalad abaar ah taasoo u baahan in laga jawaabo si deg deg ah (**Early Response**) waxaana lagu baaqay in hay'adaha gargaarku ay si dhaqsi ah uga soo jawaab celiyaan baaqa dowlada Federaalka.
- 2- In la xoojiyo wada shaqeynta iyo xog'wadaagga Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka heer Federal iyo Wasaaradaha/hey'adaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee heer Dowlad Gobaleed.

- 3- In la joogteeyo kulamada iyo shirarka si ay taas u noqoto fursadd Aqoon-Wadaagga iyo iskaashiga Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka heer Federal iyo Wasaaradaha/hey'adaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee heer Dowlad Gobaleed.
 - 4- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka Dowlada Federaalka Soomaaliya ay tahay albaabka ugu horeeya ee laga soo galayo wax kasta oo la xidhiidha gargaarka arrimaha bani'aadaminimada iyo maareynta musiibooyinka.
 - 5- Waxaa loo soo jeedinayaa dhamaan hay'adaha ku howlan arimaha bani'aadaminimada iyo maareynta musiibooyinka ee ka shaqeeya wadanka gudhiisa in ay wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee Federaalka la soo xidhiidhaan si looga hortago is barbar yaac.
 - 6- Waxaa la meel mariyay Howl-tilmaameedka uu ku shaqeynayyo Guddiga la socodka, qiimeynta iyo kormeerka ee mashruuca **ka jawaabidda xilliga dhaw ee xaaladaha deg degga.**
 - 7- Waxaa lagu wargelinayaa dhamaan hay'adaha gargaarka ee ka shaqeeya wadanka gudhiisa in ay wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka u soo gudbiyaan mashaariic iyo shaqo ah ee ay ka wadaan wadanka dhexdiisa.
 - 8- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha xubnahaka ah Federaalka ayaa ku heshiiyey in maamulada Federaalka ay bil kasto soo diraan warbixin kooban oo ka hadlaysa xaalada deegaanadooda.
 - 9- Waxaa lagu heshiiyey in kulanka xiga (Madasha arimmaha bani'aadaminimo ee dalka) lagu qabto magaalada Baydhabo ee maamul goboleedka Koonfur Galbeed
- Taariikh: 11 Luulyo 2019.

Dhammaad